



## Dugsiyadda Guud ee Portland Qaypta 504 ee Qaunuunka Dib-u-hagaajinta: Hagaha Macalinka iyo Waalidka

---

*.Qanuunka 504 ee Dib-u-hagaajintu 1973 waxa uu reebayaa in la faquuqo arday ama shaqaale Itaaldaran. Hagahan waxa uu qeexayaa macluumaadka 504 iyo sida ay Dugsiyada Guud ee Portland ay oga go'antahay in ay udabaqdo.*

*Waxaa Qoray:*  
**Dugsiyadda Guud ee Portland  
Qaypta isdhexgalka iyo Caawinta Aradyga**

*Dib-loo-qaabeeyey:*  
**Nofember 2009**

*Dugsiyadda Guud ee Portland way aqoonsantahay kala duwaanshaha iyo qiimaaha uu qof walba iyo koox waliba bulshadda ku leedahay, dhamaan ashkhaasta iyo kooxaha waxaa loola dhaqmi doonaa si cadaalad ah dhamaan howlgaladda, barnaamijyadda, iyadii oo aan loo eegin da', diin, itaal-daro, guurka, halka uu kasoo jeedo, galmoodeka nooca uu la hayo, cirqi, iimaan.*

Siyaaadda Gudiga Waxbarashadda ee  
Dugsiyadda Guud ee Portland 1.80.020-p

**For more information about this publication, contact:**  
**Macluumaad siyaadda ah oo la xidhiidha qoraalkan, la xidhiidh**  
**Isdhexgalka iyo caawinta Aradyda**  
**Madaxa Barnaamijka**  
**Phone-ka: (503) 916-5460**

<b>Waa maxay Qaybta 504?</b>	"Qaybta 504" waa qanuunka dib-u-hagaajinta ee 1973, xuquuda madaniga ah ee ka difaaca qofka itaalka daran faquuqida. Qaybta 504 waxaa lagu dabaqayaa dhamaan hay'daha hela dhaqaalaha uu bixiyo federaalku, marka lagu daro Dugsiyadda Guud.
<b>Sidee "Itaaldaradda" lagu qeexayaa Qaybta 504?</b>	<p>Qaybta 504 waxaa lagu qeexayaa Itaaldaro muuqata ama maskaxeed oo dhimaysa ama xadidaysa ka qaybqaadashadda howlaha guud ee nolosha.</p> <p>Itaaldaradda muuqata waa xaalad caafimaad ama isdabamar xagga shaqadda jirka ah.</p> <p>Itaaldaradda garashadda, waa isdabamarka barasho ama nafsiyadeed.</p> <p>Howlaha guud ee nolosha waxaa ka mid ah araga, maqalka, hadalka, socodka, qaadida, gudashadda waajibaadka, iyo kuwa kale ee la midka ah.</p> <p>Howlaha guud ee jirka waxaa kale oo ka mid ah shaqadda jirka sida neefsashadda, hurdada, qaabdhismeedka acsaabta, xiidmaha iyo kaadi haysta, iyo shaqadda qaybaha kale ee jirka.</p> <p>Xadidnaanta <i>Itaaldaradda guud</i> waxaa loola jeeda in ardayda si dhan ay isaga hortaagto xaaladaa, mid yar ama inta uu qabatimi karo howlaha qaar mark a la barbardhigo sida ay u badanyihin ardayda kale.</p>
<b>Muxuu Qaybta 504 u samayn karaa aradyda Itaalka daran?</b>	<p>Ardayda Itaalka daran waxaan laga illaaliyey faquuqida iyadii oo loo eegayo Itaaldaradda hadii ay qabaan maskax ama muuq itaaldaran kan oo sida guud ka reebaya howlaha nolosha ee asaasiga ah, ama leh taariikh Itaaldaro ama laga daweyey Itaaldaro.</p> <p>Iyadii oo la raacayo qaunuunka 504, aradyda loo aqoonsado in ay qabaan itaaldaro maskaxeed ama mid muuqata oo si guud u xadidaysa howlaha nolosha asaasiga, waxa ay leeyihii waxbarasho bilaash ah oo umunaasab ah, marka lagu daro waxbarashadda rigliga ah iyo daryeeladda kale ama caawinta loo asteeyey in uu gaadho baahida shakhsiyadeed ee ardayga itaalka daran sida ay u gaadhayso ardayda aan caadiga ah</p>
<b>Yey tahay in uu tilmaamo tixgelnta Qaybta 504?</b>	Waalidiinta iyo macalimiinta ayeeey tahay in ay tilmaamaan arday walba oo looga shakiyo itaaldaro xagga maskaxda ama muuqa ah, islamarkaana uu aamino inuu ubaahanyahay

	daryeel iyo caawinaad si uu uhelo waxbarasho munaasib ah oo bilaash ah.
<b>Yaa samaynaya Tilmaanta?</b>	team. Waalid ama macalinka ayaa ka bilaabi kara howsha isaga oo la hadla Maamulaha ama caawiyaaha maamulaha, la taliyaha dugsiga, ama isuduwaha dugsiga ee 504, waxaa ay arintan ugu horayntaba ay si toos ah ugu tagaysaa kooxda 504 ama kooxda waxbarashadda gaadhka ah.
<b>Yaa gaaraya go'aanka in ardaygu qabo Itaaldaro la xidhiidha Qaybta 504?</b>	Go'aankan waxaa lagu gaaraa koox marka lagu daro qof yaqaana ardayga, macluumaadka qiimaynta, iyo meelaynta ama ikhtiyaaraadka caawinta. Sideedaba waalidka waa lagu casumaa in uu qayb ahaan la shaqeeyo kooxdaas
<b>Macluumaad nooceee ah ayey tixgelinaysaa kooxda.</b>	Kooxda waxa ay tixgelinaysaa macluumaadka laga helo waalidka iyo macalinka marka lagu daro macluumaad kasta oo laga helo dibadda sida adeeg caafimaad bixiyasha. Hadii loo baahdo, degmadu waxa ay waydiin doontaa waalidka ogololaashaha in la imtixaano ubadka. Mararka qaar kalkalisadda dugsigu waa ay soo dhexgeli kartaa si ay uqiimayo raadka ay itaaldaradu ku reebatay ardayga iyo eegida macluumaadka adeeg bixiyayaasha caafimaadka.  Aradya soo bedeshay ee ka yimi degmo kale, kooxdu waxay u tixgelin doontaa macluumaadkii dugsigli hore aam degmadii hore  Waalidiinta waxaa la waydiin doonaa in ay bixiyaan qiimayntii hore ee caafimaad ee uu maray ubadkoodu, waxaa kale oo la waydiin doonaa in ay ogolaasho qoraal ah siiyaan dugsiga si uu dugsigu ucodsado waraaqaha caafimaad, nafsiyadeed ama waraaqaha kale. Waalidka waxaa kale oo la waydiinaya in ay ka keenaan waraaqaha caafimaad ee ubadkaga adeeg bixiyaha.
<b>Go'aan nooceee ah ayeey kooxdu gaadhayaan?</b>	Kooxdu waa in ay go'aan ku gaadhaan in ardaygu qabo Itaaldaro iyo in kale iyadii oo la eegayo qaybta 504. hadii ay itaaldaro jirto, hadana waa in ay kooxdu g'aan ka gaadhaa sidii uu ardaygu daryeel ugu heli lahaa waxbarashadiisa/deeda.  Go'aanka kooxda waa la qodobaynayaa waalidkana waxaa la siin doonaa nuqlu ka mid ah qoraalka, iyo qoraal ka hadlaya xuquuqda ay walidka sida ku xusan Qaybta 504.
<b>Waa maxay qorshaha daryeel ee 504?</b>	Qaybta 504 ee waraaqaha qorshaha daryeel waa daryeel qaas ah ama taageeradda ubadku ubaahanyahay si la hubiyo in uu helay si uu ugaadho ugu yaraan halka la doonayo, sida ay ardayda aan qabin itaal daradu ay tahay iyaguba in ay

	<p>ugaadhaan. Marka la barbar dhigo tiradda guud ee ardayda. Qaybta 504 waxaa loo qaabeeyey in ay siiso taageeradda ay mudantahay, qasab ma ahan dhamaan dhamaan caawinadda sida ugu badan u taageeraya ama caawinaad mida ugu wanaagsan.</p> <p>Kooxdu waxay si afraad ah ay ugu qeexi doontaa waxbarashadda ardayda u baahan caawinaadda, sida adeega waxbarashadda qaaska ah, 504 qorshaha waa in la hirgeliya bii'ad wanaagsan oo hagardaamo laahayn.</p>
<b>Miyuu weligii lahaanayaa aradyga itaalka daran ee qaybta 504, qorshaha daryeel ee Qaybta 504?</b>	<p>Inta badan way haysan doonan, walow aysan qasab ahayn dhamaan, marka loo qadarinayo in ardaygu uu qabo Itaaldaro Qaybta 504, kooxdu ma ay qiimayn karaan arimo dhowr ah sida dawadda, qalabka loo adeegsado itaaldaradda sida kuwa caawinta dhagaha, ama walxaha kale lagu taageeri kaaro ardayda(marka laga reebo miraaydaha indhaha ama lasaaqadaha)kuwa waxaa lagu magacaabaa “kuwa yaryar”.)</p> <p>Mararka qaar, ardaygu uma baahna qorshaha Qaybta 504 hadii caawinta fardi ama kaalmo (ay yihiin kuwa yaryar ee xagga sare lagu xusay) kuwan oo u ogolaanayaa in uu fursad u helo waxbarashadda.</p>
<b>Waa Maxay “daryeelku”?</b>	Daryeelu waa cadilidda loo qaabeeyay in ay yarayso waxyeeladda itaaldaradda si ay fursad ugu siiso barnamijyadda dugsiga. Ma jiro liis daryeel oo la ansixiyey. Dareelka waa in si gooni gooni ah arday walba loogu sugaa.
<b>Kooxdu waa in ay ogolaadaan taladda dhakhtarka ama adeeg bixiyaha?</b>	Hadii dhakhtarku uu mudanyahay in uu bixiyo taxliil dawo , waa muhim in aad ogaato in dhakhtarka ama adeeg bixiyaha taladiisu ay tahay nasiixo. Kooxda dugsiga waa in ay tixgeliyaan ilo dhowr ah islamarkaana ay go'aan ka gaaraan hadii ardaygu u baahanyahay adeeg daryeel, intay dooniba ha la ekaato, hadii loo baahanyahay!
<b>Qorshaha daryeel ee Qaybta 504 ma la mid baa IEP?</b>	<p>Maya. IEP(Barnamijyadda Waxbarasho ee Kelikelida ah) waxaa loo dhigaa qoraal ku jeeda ardayda Itaalka daran iyadii oo loo eegayo Shakhsiyadka Itaaldaradda waxbarashadda (IDEA). Ardaydaas waxay u baahanyihii Adeegyadda waxbarashadda gaarka ah si ay umutaan IEP.</p> <p>Qorshaha daryeel ee Qaybta 504 waxay isku nooc yihiin IEP Walow aysan ahayn sida loo dhigay, Ardayda qaba itaaldaradda 504 ee aan ubaahnayn waxbarashadda gaarka ah waxay heli karaan 504 hadii ay ubaahanyihii daryeel ama caawinad kale ee la xidhiidha dugsiga si ay fursad ugu helaan dugsiga.</p>

<b>Maxaa dhacaya hadii aysan isku raacin hadii ardaygu uqabo Itaaldaro ama waxa loo baahanyahay in uu qorshuhu noqdo.</b>	Kooxdu waa inay go'aan loo dhanyahay gaadhaan. Hadii aysan suuragal ahayn in la gaadho go'aan loo dhanyahay, kadib waxaa xubno ka tirsan degmada(oo ah maamulka) ay gaari doonaan go'aan, hadii uusan waalidku ku qanacsanayn go'aankaas, waxay waalidku soo gudbinkaraan ikhtiyaarka dib-u-xalinta arinta.
<b>Waa maxay ikhtiyaarka xalinta ee Qaybta 504?</b>	<p>Waalidku waxa ay waydisan karaan kulan aan caadi ahayn maamulaha dugsiga ama xigihiisa si ay u eegaan arinta oo ay aragtidooda oga dhiibtaan.</p> <p>Waalidka ama howlwadeenadda degmadu waxa ay la xidhiidh karaan Maamulaha Barnaamijka Qaybta 504 iyaga oo talo ama umuur yasir ka doonaya. Waalidka ama howlwadeenadda waxay la xidhiidh karaan Adeegyadda Isdhexgalka Aradyda, matalaha waalidka si ay oga codsadaan wixii talo ama taageero ah.</p> <p>Waalidku waxa uu adeegsan karaa Qaybta 504 ee Nidaamka Ashtakadda PPS ama wuxuu ashtako ugubin karaa Xafiiska Xuquuqda madaniga ah ee federaalka.</p> <p>Waaliidintu waxa kale oo ay leeyihii xuquuqda in ay ka codsadaan dhagaysi Wasaaradda Waxbarashadda Oregon hadii aysan aqoonsanayn Sii loo xadiday Hawiyadda, qiimaynta, meelaynta ama sida loogu adeegay ardayga oo ay u arkaan in ay tahay mid uusan mudnayn.</p>
<b>Goormaa dib loo eegayaa Qorshaha Daryeel ee Ardayga?</b>	<p>Qorshaha waa in ugu yaraan sanad walba dib-loo-eegaa.</p> <p>Hadii ay degmadu doonayso isbedel dhab ah oo la xidhiidha meelaynta, waa in la sameeyee dib-u-qiimaynta iyo eegida ka hor waqtiga isbedelka la filayo.</p>
<b>Muxuu yahay “isbedelka dhabta ah ee meelaynta”?</b>	<p>Isbedelka muhimka ahi waa meelaynta waa meelaynta bedelaysa sidii caadiga ahayd, nooca iyo waqtiga barnaamijyadda waxbarashadda ee ardayga. Isbedeladda aan waynayna ee barnaamijkuan waa sida macalin cusub ama ardayga oo fasal cusub loo wareejiyey,ama dhisme cusub barnaamijyo isku wada mid ah uma tixgelino isbedel muhim ah.</p> <p>Isbedelka dhabta ah ee meelayntu waxa uu udhacayaa sababta ardayga ayaa u baahan in ay wax iska bedalaan ama ardayga ayaa ku biiray arin maxsuulkeedu yahay in talaabo laga qaado oo laga saaro dugsigaa.</p>
<b>Dhamaan xanibaadda iyo cayrinta dugsiga</b>	Maya. Xanibaadda ama ceyrinta in kabadan 10cisho oo maalmaha dugsiga ah oo xidhiidh ah waxaa loo tixgelinayaan

<b>maxaa loo tixgelinayaa in ay muhimtahay</b>	<p>isbedel muhim ah ee meelaynta.</p> <p>Xanibaadda kooban oo marka la isku daro ka badan 10 cisho oo maalmaha dugsiga ah waxaa loo tixgelinayaa isbedel muhim tan la xidhiidha hadii uu jiro “wadaag” ee cayrinta. “Wadaag” waxaa lagu qeexayaa eegida dhererka cayrin walba, sida ay isugu dhow yihiin cayrinta, iyo tiradda guud ee inta la eryay.</p>
<b>Sidee ardayda “504 oo keliya” oga badbaadinayaa in la xanibo ama la eryo xaalad la xidhiidha itaaldaradda ardayga?</b>	<p>Ka hor inta aan la meel marin xanibidda ama eryidda oo wax ka bedeli doonta meelaynta, dugsigu waa in uu qabtaa kulan kooxeed ujeedadiisu tahay in ay sameeyaan dib-u-eegida.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li>• hadii falkaa ardaygu ay ka dhalatay ama ay lahayd saamayn toos ah itaaldaradda ardayga; iyo</li> <li>• Hadii ay falkaa ardaygu ka dhalatay ama ay xiriir toos ah la leedahay dugsiga oo aan hirgelin Qorshaha Daryeel ee Ardayga Qaybta 504.</li> </ul> <p>Hadii kooxdu ay go'aan ku gaarto in mid un labadaa ka mid ah uu sax yahay dugsigu ma meel marin karo xanibaadda ama eryidda(siday noqotaba waxaa ardayga lagu ciqaabayaa ihaanadda lala xiriirinayo maandooriye ama alkolo intii la marsiin lagaa ardayga aan qabin itaaldaradda.</p> <p>Hadii kooxdu go'aan ku gaarto in falkaa uu keenay ama uu xidhiidh toos ah la leeyahay itaaldaradda ardayga oo aysan dhalin iyadii oo aan la hirgelin qorshaha Qaybta 504, ardayga waxa lagu ciqaabayaa sidii loogu ciqaabi lahaa ardayga aan itaalka darnayn.</p>
<b>Yaan la xidhiidhaya hadii aan doonayaa macluumaad dheeraad ah oo ku jeeda Qaybta 504?</b>	Dugsi walba waxa uu leeyahay isuduuhaha 504. Waxaad sidoo kale la xidhiidhi kartaa Maamulaha barnaamijka 504 ee PPS